Hantida Daahsoon

"Cilmigu waa hanti aan la taaban karin"



W/Q: Aa'isha Sheikh Ali

HANTIDA DAAHSOON

Bilaabe: 15/11/2022

Abye: 30/6/2023

Qore

Aa'isha Sheikh Ali

Hantida Daahsoon

Mahadnaq & hadiyaden

Allah ayeey mahadi oo dhan u sugnaatay, Buugani waxa aan u hadiyadeynayaa dhammaan akhrista yaasha jecel in ay maankooda koriyaan.

xigasho

Buugani waxa aan ka soo xigtay qoraayo aan la soo koobi karin oo wax ku soo gudbiya baraha bulshada, Aniga oo ururiyay xogaha mowduucyada aan doonayo, sidokale waxa aan ka soo xigtay buugaag badan waxaa kamid ah kuba halka hoose ku xusan.

Awoodda Caqliga Daahsoon. W/T: Xamse Tudhaale

Maareynta Waqtiga W/T: Ismaacil Yukaale Cige

Boqol maqaal iyo barkada qalinka. W/Q: Cabdullaahi M. Cawsey

Waqti tagay tiigsi ma leh. W/Q: C/raxmaan maxamed ciise

W/Q: Aa'isha Sheikh Ali Mohamed

Email: caisha342@gmail.com

NO:252617481342

HANTIDA DAAHSOON

HANTIDA DAAHSOON

CUTUB-YADA BUUGGA

1) **Caafimaadka/Badqabka**.....08

- Waa maxay badqab?.....08
- Muhiimad caafimaadka 10
- Talooyinka caafimaad.....11

2) **Caqliga/Garaadka**.....12

- Waa maxay Caqli?..... 12
- Qeybaha Caqliga.....14
- Sifooyinka dadka caqliga leh.....20
- Caqliga (Sheeko).....22

3) **Waqtiga/Aminta**.....25

- Waa maxay waqti?.....25
- Qeybaha waqtiga 26
- Muhiimaha waqtiga.....30
- Hababka waqtiga looga faa'ideysto.....32

4) **Cilmiga/Aqoonta**.....37

- Waa maxay Aqoon?.....37
- Faa'iidada barashada cilmiga.....41
- Waxtarka barashada cilmiga 42
- Aqoonta(xikmado).....45

Hantida Daahsoon

Waxa aad sheegtaa shey gala hal akoon, akoonkaas oo leh hal magac iyo hal shaabad, waxa uuna dunida ku leeyahay dhowr bilyan oo xarumood ?

Hadaba sheeg waa maxay sheygaa?

Sheeg magaca akoonka?

HANTIDA DAAHSOON

Hordhac

Hantiyaha daahsoon waa hanti aan la taaban karin, lagaana xadi karin.hantidana waa hanti aan inooga muuqan indhaheena. Hantiyaha daahsoon waxaa ka mid ah:

- Caafimaadka ama Badqabka
- Caqliga ama Garaadka
- Waqtiga ama Aminta
- Cilmiga ama Aqoonta

"Qiimaha waqtigu waa qiimaha Nolashaada"

"Caafimaadku waa sheyga ugu horeeya ee kuu suura galinaya inaad sameyso dhaqaaq qurxoon"

"Caqliga iyo Cilmiga waa ciidan u heelan ilaala-daada iyo hormarinta naftaada"

Caafimaadka/ Badqabka

caafimaadku waa: waa marxalad dhamaystiran oo muuqaal, maskax, xidhiidh bulsho iyo habdhaqan dhamaystiran ee qof leeyahay, taasi oo xor ka ah xanuun iyo dhibaato. Caafimaad waa heerka awood ee qof leeyahay ayadoo laga eegayo awooda muuqaal, maskaxeed iyo xarakaadka waajehida iyo maamulka nolosha maalinle.

In la lahaado caafimaad fiican micnaheedu waa in la dareemo wanaag jir ahaan iyo maskax ahaan labadaba. Caafimaad jir ahaan fiican micnahiisu waa in jirku dareemayo wanaag. Haddii aad cunto raaashin fiican, dhaqdhaqaaq samayso si joogto ah, in kugu filan seexato oo iska ilaaliso tobaakada, khamriga iyo daroogada sidaasi waxay xoojinaysaa difaaca jirkaaga oo yaraynaysaa khatarta dhanka cudurada iyo dhibaatooyinka.

In la lahaado caafimaad fiican maskaxiyan micnaheedu waa inaad leedahay isku dheeli tir u dhaxeeya dareemadaada fiican iyo kuwa xun.

HANTIDA DAAHSOON

Tani micnaheedu waa in xitaa aad ku qanacsantahay nolosha iyo inaad xiriiryo fiican la leedahay qoyska, saaxiibada ama dadka kale ee aad taqaano.

Caafimaadkaaga maskax ahaan iyo jir ahaan way isa saameeyaan. Haddii aad si xun dareemayso maskax ahaan badanaaba waxaa aad leedahay xitaa xanuun jirkana ah.

Caafimaadku waa sheey aad u qaali ah , waa hanti uu Allah kuugu deeqay, taa oo lagaa doonayo inaad kaga mahad naqdo Allah. Waxaa jiro dad badan oo buka balse jecel ineey caafimaadaan si ay wax uun u qabsadaan, caafimaadkaagu waa muhiim, wuxuu muhiim u yahay wax qabadkaaga iyo tayadaada nololeed. Cafimaadku waa waxa kaliya muujinaya waxa aad adiga tahay.

Nabiga SCW waxa uu yiri "ka faa'ideyso shan shan hortood, ka faaideyso caafimaadkaaga inta aadan xanuunsan". Caafimaadku waa hanti aad heeysato oo aadan dareensaneyn, hadana si bilaash ah laguu siiyay, balse ma dareensanid qiimaha caafimaadka. Si aad u ogaato qiimaha caafimaadka uu leeyahay waxad booqataa kuba buka, waxa kaliya ay haminaayaan waa ineey helaan caafimaad buuxa.

Ka faa'ideeyso waqtigaaga inta aad badqabto, oo ku daadaal caafimaadkaaga. Allah ha caafiyo inta xanuunsan.

Muhiimada Caafimaadka qofka

- Caafimaadku waa sheyga ugu horeeya ee kuu suura galinaya inaad sameyso dhaqaaq qurxoon
- Caafimaadkaaga oo wanaagsanaado waxuu cadeynayaa inaad la imaan karto ficilo iyo afkaar.
- Caafimaadka waa hantida ugu qaalisan ee uu qofku heysto, waana hadiyad uu Allah ugu deeqo adoomadiisa.
- Hadii aad tahay ruux caafimaad qaba waxa aad ka nasiib badan tahay bukaanada la taahaya xanuunada qaar.
- Caafimaadku waxa uu ka muhiimsanyahay wax walba oo dunida yaala, dad ayaa lacagohooda oo dhan u bixiya sida ay caafimaad wanaagsan u heli lahaayeen oo kaliya.

Talooyin caafimaad

- Cabista biyaha badan waxa ay wanaajiyaan caafimaadka qofka
- Cunida cunto isku dhiilo tiran, oo ka kooban dhamaaan waxa uu jirku u baahanyahay waxa ay kaa saacideysaa badqabkaaga.
- Seexashada hurdo kugu filan xilliga habeenkii waxa aad ka heleysaa nasiino iyo xasilooni jir ahaan iyo maskax ahaanba, iyo in ay maskaxdaadu aad u shaqeyn karto.
- Ku dadaalida nadaafadda jirka, dharka iyo aqalka, waa ka hortagga cudurada iyo cudur dhaliya yaasha.
- ka fogoow meelaha iyo walxaha kuu keeni kara walaaca, stress ka.
- Jimicsigu waxa uu fiicanyahay badqabka xibnaha jirka, iyo furfuridda dhiiga.
- Markasta la soco xaaladahaaga caafimaad, kuna dadaal wax walba oo kor u qaadaya badqabkaaga.

✓✓✓✓✓

Garaadka

Alle ayaa mahad leh ina siiyey caqli wanaagsan inagana dhigay dad caqli leh waxna fahma, waxkasta oo wanaag ah qofkii sameeya waxaa lagu tiriyaa inuu yahay qof caqli leh, cidkasta oo horumar sabab u noqotana waxaa lagu tiriyaa inuu yahay qof caqli wanaagsan leh, cidwalba oo ka shaqeysa wanaagga, horumarka, tacliinta, dib u dhiska iyo dib u heshiisiinta, waxaa lagu tiriyaa dadka u saaxiibka ah caqli wanaagsan.

Waa maxay Caqligu ?

caqligu wa tayada qof ee fahanka, garaadka, xalinta, xasuusta, ogaanshaha, helitaanka, taxadirka, xidhiidhka, wax-barashada, dareenka, qorshaynta, abuurida iyo xalinta dhibaatooyinka. Waxa laga yaabaa ineey qodobada lagu sharaxo caqligu ka badan yahay intani, laakiin guud ahaan dadka iyo xayawaanku weey ku kala duwan yihiin qodobadaas aan kor kusoo sheegnay.

Qeexida Caqliga sida uu wariyay Imaam Dardiir, Sheekhul Azhar, qoraaga kitaabka Al-Khariida Al-Bahia: "Waa sir ruuxi ah oo ay naftu ku fahanto cilmiga lagama maarmaanka ah iyo cilmiga aragtida,

meesha uu ku yaalana waa qalbiga, iftiinkiisuna waa Maskaxda,

waxa uu biloowdaa marka nafta lagu afuufo uur-jiif-da, dhamaystirkiisa ugu horreeyana waa qaan-gaarnimada"

Caqliga carabi ahaan waxaa la yiraahdaa xarig xoolaha lagu xiro ama lagu dabro si aanu xooluhu u fakan ama aanu u cararin, Sidaa darted ayaa Caqli logu bixiyayn in uu xannibo qofka bini aadamka ah isagoo ka reebaayo waxyaalaha xun xun. Caqligu waa mid aad ugu muhiim ah qofka, shuruudaha islaamka waxaa kamid ah in uu qofku leeyahay Caqli, diintu waa dhaqan, dhaqanka qofka bini'aadamka ah waxaa wanaajiya waa Caqliga.

qofka ugu caqliga badan waa qofka garanaya sababta loo abuuray iyo waxa ka dambeeya, Caqligu waa awood halis ah, hadii wanaaga loo adeegsado waxbuu dhisaa, hadii xumaha loo adeegsadana wax ayuu burburiyaa, Caqliga wanaagsan waa ubax qurux badan oo aan ka bixin beertaada.

Caqliga waa hibada ugu weyn ee qofku adeegsan karo marka la furfurayo ama la xalinayo arrimaha cakiran ee nolosha.

Marka garashada lagu ogaado sababaha dhabta ah ee ka danbeeya dhibaato kasta, waxaa fududaada in si niyad ah loo abbaaro xalinta duruufaha adag ee ka jira deegaanka ayadoo lagu shaqo tagayo murqo waaweyn oo waliba ku hubaysan qalab ama farsamo wixii markaas la heli karo.

Qeeybaha Caqliga:

Marka la qiimaynayo caqliga qofka waxaa la eegaa qoto dheerida garashada shaqsiga " IQ" ayada la adeegsanayo su'aalo ku saabsan xusuusta, dhiraandhirinta , xalinta iyo furdaaminta mushkiladaha markaas la gorfeynayo, Qofka caadiga ah ee Soomaaliga ah inta badan waa qof garasho dheer oo si fudud uga gudbi kara su'aalaha lagu cabbiro heerarka kala duwan ee garashada "IQ" isla markaana si fiican u fahmi kara hadba mawduuca markaas miiska saaran.Qolyaha Cilmi-Nafsiga waxay Caqliga aadanaha u qaybiyeen afar nooc oo kala ah:-

"1) Intelligence Quotient (IQ): Caqliga noocaan ah waa qayta qofka awooda u siinaysa inuu wax xifdiyo, wax xasuusto iyo inuu xaliyo xisaabaadka iwm. Wuxuuna ka turjumayaa heerka fahanka qofku halka uu gaarsiisanyahay.

HANTIDA DAAHSOON

Qofba qofka uu ka sarreeyo Intelligence Quotient (IQ), waa uu ka garaadsareeyaa, marka loo eego heerka fahanka. Waxaadna heerkaaga caqliga ee noocaan ah aad ku ogaan kartaa sida ay tahay; heerkaaga xasuustaada, xifdinta, iyo xalinta xisaabaadka iwm.

2) Emotional Quotient (EQ): Caqliga noocaan ah, qofka waxa uu awood u siiyaa inuu noqdo qof masuul ah, aamin ah, runlaw ah, aan isla waynayn iwm. Wuxuuna awood u siiyaa qofka inuu si dagan ula noolaado dadka kugu xeeran ee hareerihiisa ah. Qofba inta uu qof kale ka masuulsanyahay, ka aaminnimo badan yahay, ka run badanyahay; waxa uu ka sareeyaa caqliga looyaqaan Emotional Quotient (EQ).

3) Social Quotient (SQ): Caqliga noocaan ah, qofka waxa uu awood u siinayaa inuu noqdo qof dad isku wad leh iyo inuu qofku samayn karo shabakad saaxiibo ah uuna muddo dheer isku wadi karo saaxiibadiisa. Hadii aad ku liidato isku wadka dadka waxaa hooseya Caqliga loo yaqaan Social Quotient (SQ).

4) The adversity Quotient (AQ): Garaadka noocaan ah, waxa uu qofka uu awood u siiyaa inuu ka gudbo caqbadaha nolosha oo uusan noqon qof isku dhiiba

caqabadaha. Waxay leeyihiin qofka AQ-kiisa uu sareeeyo ma ahan qof isdhiiba ee waa qof duruufaha iyo caqabadaha la hardama ilaa uu ka guulaysto.

Haddii aad aragto qof aan u duqlaadan karin caqabadaha nolosha oo horay iska dhiibo, marka noocyadaan caqliga loo fiiriyo waxa ay Kasmanafeedku qabaan in uu AQ-ka qofka uu hooseeyo.

Qoloda Cilmi-Nafsiga waxay ku doodayaan in dadka leh Emotional Quotient (EQ) iyo Social Quotient(SQ) heerkoodu aad u sarreeyo inay nolosha meel-sare ka gaaraan marka la barbar dhigo kuwa leh Intelligence Quotient(IQ) heerkiisu sareeyo balse Emotional Quotient(EQ) iyo Social Quotient (SQ) uu aad u hooseeyo.

Waxay intaa ku dareen in goobaha waxbarashada marka lajoogo ay sare u qaadaan garaadka looyaqaan IQ, balse aysan wax danayn ah ay siinin EQ iyo SQ. Waxayna qabaan in sida ay muhiim u tahay in IQ Qofka sare loo qaado ayay muhiim u tahay in EQ iyo SQ Qofka sare loo qaado.

HANTIDA DAAHSOON

Khuburada Cilmi-Nafsiga waxay leeyihiin qofka uu sareeyo IQ balse ay hooseeyaan EQ iyo SQ mustaqbalka waxa uu shaqaale u noqondoonaa kuwa leh EQ iyo SQ-koodu uu sareeeya balse uu isagu ka IQ sareeyo.

Dhamaan doodahaan waxay u muuqdaan kuwo maangal ah, waayo; hadii heerkaaga IQ uu sareeyo balse aad tahay qof beenlaow, tuug, masuuliyad aan qaadi karin, sidoo kalena aadan dad isku wad lahayn waxba kuma taraayo IQ sareeya kaligii.

Ugu danbayn: Quburada Cilmi-Nafsiga waxay dadka kula taliyeen hadii uu rabo Qofku inuu dhinac kasta oo noloshiisa ah uu hormar ka sameeyo waa inuu iska xoojiyaa oo uu dhisaa guud ahaan afarta nooc ee Garaadka, ayaga oo si gaar ah waalidiinta kula taliyay inay ilmaha intay yaryihiin ay ka hagaajiyaan afarta nooc ee caqliga, si uu mustaqbalka u noqdo qof isku filan oo aan cidna ku tiirsanayn.

Sida ay dadku ugu kala duwan yihiin awooddooda jireed, cabbirkooda iyo xirfadahooda dhaqdhaqaaqa, waxay sidoo kale ku kala duwan yihiin Caqliyadooda iyo kartidooda Caqliyadeed, waxayna ku kala duwan yihiin midba midka kale habka fekerka,

tani waa marka la eego dhaxalka, bulshada. barbaarinta, deegaanka iwm, waxaa jira Cqli qarsoon iyo Caqli muuqda. kuwan soo socda ayaa ah qeybaha qaarka kamida caqliyada:

Qeybta sare

Qeybta sare ee caqliga waxaa la shaqeysa dareensideyaal oo ay kamid yihiin maqalka iyo araga waana qeybta aynu ka fikirno, wax ka kala doorano, oo aynu xulashada ka sameeno, oo aynu go'aamada ku qaadano.

Qeybta hoose

Qeybta hoose waa qeybta inoo ururiso dareemada. Qeybta sare wixii kasoo gudba ee qeybta hoose usoo gudba waxay noqdaan caadooyinkeena iyo dhaqankeena aan maalinlaha sameyno.

Qiimaha qofka waxa uu la egyahay hadba inta uu garaadkiisu la eg yahay. Maskaxdu waa weel wixii ku jiro ayaa ka dhex muuqanaya dhaqankaaga. Qofka ugu caqliga badan waa kan aduunyada ka taga inta aysan ka tagin iyada. Waa qofka Allah raali galiya inta uusan la kulmin.

HANTIDA DAAHSOON

Dadka caqliga badan waxay wax u qabtaan si ka duwan dadka kale, Wax uma qabtaan si dhaan raacnimo ah. Dadka caqliga badan waxay aamminsan yihiin waxbarashada joogtada ah iyo horumarka nafta. Dadka caqliga badan waxa ay ka caawiyaan dadka kale inay koraan nolosha, kama baqayaan inaad dhaafto iyaga. Aragoodu gabi ahaanba wuu ka duwan yahay kan dadka caadiga ah. Dadka caqliga badan waxa ay awooddaan in ay kaala sheekaystaan mawduucyo kala duwan. Waxay ka hadlaan xaqiiqooyin iyo mararka qaarkood arrimo ugub ah. Halka dadka caadiga ah ka hadlaan kutiri kuteen, buunbuunin iyo been.

Haddaad rabto dadka in caqligoodu ku aqbalo , waxa ka horeeya qalbigooda inad furto qofkaad qalbigiisa furi kari weydana caqligiisana ma furi garaysid ; qalbigana waxa lagu furaa jacayl , naxariis iyo hadal wanagsan "

La fadhiiso dadka caqliga badan, xitaa haddii ay yihiin cadawgaaga, waayo caqligu caqliga ayuu la hadlaa. Dadka caqliga badan waxay leeyihiin asxaab badan, cadowgooduna wuu yaryahay, waayo saaxiib sanad baad ku heshaa cadowna hal maalin, wanaagna waxaa leh qofka Alle siiyo dabeecad wanaagsan.

Heerarka Caqliyada:-

Eleanor Roosevelt waxa uu yiri:

1-Caqliyada waaweyn waxay ka hadlaan fikradaha.

2-Caqliyada caadiga ah waxay ka hadlaan dhacdooyinka.

3-Caqliyada yar yar had iyo jeer waxey ka hadlaan dadka.

Sifooyinka dadka Caqliga leh:

- Waa dad og heerka aqoontooda, Dadka caqliga badan si fudud ayay u qiran karaan waxayaabaha ay aqoonta u lahayn. Kuma adka mana ka baqaan in ay dhahaan ‘ma aqaanno’.
- Waa dad aan hadal badneen oo aamusan,hadey hadlaana waxay ku hadlaan hadal miisaaman.
- Way maskax furan yihiin, Dadka garaadka badan fikradaha iyo fursadaha cusub illinka kama soo xirtaan
- Waa dad aan jecleyn maalaa yacniga, waqtigoodu waxa ay galiyan wax faa'iido u leh naftooda.

HANTIDA DAAHSOON

- Waa dad u fakara hab wanaagsan, lehna waayo aragnimo, oo aan ku dagdagin wax walba, lehna hubsiimo badan.
- Cilmi baaris la sameeyey ayaa lagu ogaaday in dadka caqliga iyo hibada leh uu far qoraalkoodu liito, taasna waxay ku sababeeyeen in ay maskaxdoodu ka xawaare sareyso gacmahooda.
- Waxay jecel yihiin cidlada, Dadka dhugta badan waxaa kale oo ay wadaagaan in ay yihiin dad uruursan, oo buuqa iyo isdhexgalka faraha badan ka fogaada..

Goranyadu ilmaheeda

Aroori bay dhigtaayoo

Aboodigu ku laayaa.

Shinbirtuna aroosay

Ilaxidhoo ammaana bay

Ubadkeeda seexisaa.

Caqliga wanaagsani

itaal inuu ka roonyahay

bal eegoo u fiirsada.

Abwaan Xasan sheekh Muumin.

Caqligu waa program (Sheeko)

Wuxuu na waydiyay caqli waa maxay? mid ardayda ka mid ah ayaa si dhakhsi ah u istaagay waa maskaxda ayuu yiri. Ok ayaa lagu yiri xoolaha sow maskax ma lahan. Haa ayuu ku jawaabay. Marka xoolaha caqli ayay leeyihiin miyaa ayaa si dagan loo waydiiyay

Intuu geesaha fiiriyay sida qof salaama noqsanaya ayuu yiri macallin maya, caqligu maskaxda ma ahan. Waa loo dhoolacadeeyay, markii suaashii dhowr mar soo laabatay nin walbana is yiri ha galin dhiiqadaan ayuu macallinku nagu yiri caqligu waa program, mid xoogaa meelaha IT ka

bursan jiray ayaa lasoo booday macallin kaama yeelin. Waxyar sug ayaa la yiri macalin inaad i dhahdo iyo kaama yeelin inaad i dhahdo isma qabanayaan. Waxaana loo raaciyay caqligu waa program, maskaxduna waa kumbiyuutar ama programka mobile-ka ku shaqeyo. Mobile program la'aan ma shaqayn karaa?

Maya ayaan lasoo boodnay maskaxduna caqli la'aan ma shaqayn karto, Warku xoogaa wuu naga daadagay, midkii kaama yeelin lahaana wuu iska aamusay balse macallinkii ayaa yiri yaa suaal qaba.

HANTIDA DAAHSOON

Mid baa tiri aniga ustaadii. Soo daa ayaa lagu yiri. Waxay tiri ustaadi dadka xumaanta sameeya mala dhihi karaa dadka kale way caqli yar yihiin.

Macalinkii ayaa cod xoog badan oo xanaaq ka muuqdo ku yiri istaag adiga, markay istaagtayna ii taagnow ayaa loo raaciyay! Gabadhii ayaa qalbiga iska tiri maxaa su'aasha kala doontay macalinka. Waxyar kadibna waxay maqashay macallinkii oo leh u sacbiya, gabdhahan, su'aal muhiim ah ayay i waydiisay, ii fariiso adigana. Waa su'aal muhiim ah waliba aad la isu waydiiyo.

Meel yar ayaan idin ka tusaa ayuu yiri dadka xumaanta sameeyo dadka kale kama caqli yara, adiga labo mobile mid hadaa wacdi ku shubto midna aad heeso ku shubto ma waxay ka dhigan tahay in mobileka heesaha ku jirto ka xun yahay kana liito mobileka wacdiga ku jiro.

Maya ayaan wada dhahnay. Isla mobilekii heesaha ku jiray ayaa wacdi lagu shubi karaa, waa sax ayaan dhahnay. Hadaba ogow dadka xumaanta samaynaya maskaxdooda waxaa ka buuxa programyo xun sida heeso, xaasidnimo, aflagaado, xan iyo kuwa kale kuwa wanaaga samaynayana maskaddooda waxaa ku jir programyo wanaagsan sida quraan, salaad, sadaqo, dhoolacadayn iyo kuwa badan.

HANTIDA DAAHSOON

Sida mobileka waxa lagu shubay uga daarmaan ayay maskaxduna waxa lagu shubay soo amartaa, waxa maskaxda lagu shubay haday wanaag ahayen wanaag sameey ayay ku ledahay haday xumaan ahaayeena xumaan ayay sameey ku leedahay. Adiga marka waxaad rabto ku shubo ayuu noogu soo gabagabeeyay.

“Haddaan guga kuu kordhaa,

gaboow mooyee ku tarin,

garaad iyo waaya-arag,

illeen wax ma dhaantid geed.”

Abwaan Gaarriye: Gurmad.

"Caqligu waa hanti kamid ah hantiyaha daahsoon ee uu Allah adoomadiisa ugu deeqay"

✓✓✓✓✓

Aminta/waqtiga

Waa maxay waqti/Amin?

Waqtigu waa taxanaha socda ee dhacdooyinka dhacaya. Aristotle: "Waqtiga waa qiyaasta dhaqdhaqaaqa la xisaabin karo ee la xidhiidha ka hor iyo ka dib."

Waqtigu waa waxa ugu qaalisan ee uu qofka ibnu aadamka ahi haysto inta uu nool yahay, waana raasamaalka ugu faa’iidada badan haddii si wacan looga faa’iidaysto oo loo qorsheeyo, sida ay xikmaddani leedahay "waqtigu waa waxa nolosha laga sameeyo" Nolosha qiimaheedu waxa ay ku xidhan tahay qiimaha waqtiga iyo ka faa’iidaysigiisa.

Qiimaha wakhtigu waa sida birta xadiidkaa oo kale; Markasta oo aad birta aad galiso juhdi iyo dadaal si aad uga dhigto mid wax tar leh, waa mar kasta oo qiimaheedu kordho! Tusaale ahaan: Biraha qaar waxaa laga dhigaa middiyo, qaar saacado, qaar waxyaabaha ay dumarku xidhaan, qaar guryaha lagu dhistaa. Qiimaha birtu wuu kordhayaa mar kastoo qaabka birta iyo wax tarkeeda la kordhiyaba.

Wakhtiguna waa sidaas oo kale, qiimihiisu wuxuu ku jiraa habka aad juhdi u galisid nidaamkiisa iyo maamulkiisa isla markaana aad uga faa’iideysato.

Horumarka dad sameeyaan iyo xaddaaradahoodu waxa ay ku xidhantahay kuna yimaddeen sida ay wakhtiga u isticmaalaan, u maamushaan, ugana Faa’iideystaan. Dib udhaca kuwa kalana waxa uu ku yimid sida ay wakhtigooda u dayacaan. Qof kasta oo inaga mid ahi wuxuu haystaa 24(afar iyo labaatan) saacadood maalintii. Keena faqiirka ah, ka taajirka ah, ka faraxsan, ka murugeysan, keena yar iyo keena weyn intuba. Waxaa kaliya oo aynu ku kala duwanahay habka iyo sida aynu u isticmaalno ugana faa’iideysanno wakhtigeenna qaaliga ah.

Qeybaha waqtiga

Guud ahaan waqtiga waxa uu u qaybsamaa siddax qeybood oo kala ah:

- **Tagto(shalay)**, . Shalay: Waa maalin tagtay oo aan kugu soo laabanayn waxii ay guul iyo khasaareba lahayd way la tagtay, mana soo ceshan kartid. Waxa se laga yaabaa haddii aad tahay qof dhugasho leh inaad haddana si dadban uga faa’iidaysato maalintaa

ku dhaaftay ee aan soo noqoshada lahayn. Waxa su’aashu tahay, sidee ayay suurto gal u tahay inaad tiraa waqti tagay ayaan ka faa’iidaysanayaa? Way fududdahay, waxaana garan kara kaliya qof caqli u saaxiib ah. Ugu horrayn, waa inaad dareento wixii ku seegay shalay kuna dedaasho in aanay dib u dhicin si ay daawo ugu noqoto soo noqnoshada marxaladda caynkaas ah.

- Joogto(maanta), maanta: Waa maalinta ugu qaalisan cimrigaaga waana raasammaalka ugu weyn ee aad haysato. Waa maalinta ugu qaaalisan noloshaada, qiimaha noloshaada oo dhamina waxay ku xiran yihiin saacadaha yar ee ku jira noloshaada, qiimaheeduna waxa ay noqonaysaa sida aad hadba ugu faa’iidaysato oo keliya waayo manta markaad ka faa’iidaysato berrina waad ka faaidaysan kartaa iyo cimrigaaga oo dhanba laakiinse hadaad maanta lumiso berritana waad lumin sidaasaadna ku lumisay noloshaadii oo dhan waxaa la yiri "qofka waxa jooga aan garani waxa soo socda ma garto".
- Timaado(Berri), Berri: waa maalin maqan mana garan kartid waxa ay kuu sido waxay noqon inaad gaarin iyo in kale alle (SWT) keligii ayaa og berri iyo waaayaheeda mana aha inaad ku xisaabtanto

waxanad garanayn wax ay noqon, haddaad waa bariyeysato ha sugin in aad galabaysato, hadii aad galabaysatana ha sugin in aad waa bariyeysato, Waayo ma ogid inaad subax leedahay iyo in kale, laakiin maanta ka dhig maalinta guushaada, camalkaaga iyo hawlahaagana u samee sida ugu wacan ee ugu quruxda badan. Hammigaaga iyo dadaalkaagana isugu gee saad manta u guulaysan lahayd, taasina waa sirta nolasha sarraynta iyo farxadda waxa aa la yiraahdaa "qaamuuska waqtiga kelmed keliya ayaa ku jirta kelmedaasina waa – iminka ama hadda – macnihii waa daqiiqadaa aad hadda joogto oo keliya". Taasina waxa ay kuu caddaynaysaa in waxa aad haysataaba yahay daqiiqaddaa aad joogto oo keliya, qiimaha noloshaaduna waa hadba inta ku soo marta sida aad uga faa’iidaysato.

Waqtiga waydii su’aalo

Waxaad helaysaa jawaabta

Inuu wax yar yahay aduunku.

HANTIDA DAAHSOON

“Hammi ama Han sare oo aad yeelatay waxa ay sabab u noqneen in aad hadaf dajisato. Hadafkaasina waxa uu sabab u noqday in aad wakhtigaaga maareyso. Wakhtigaaga oo aad maareysay ayaa ah sababta koowaad ee guushaada".

Wakhtigu waa waxa ugu qaalisan ee aynu haysano waxaana la odhan karaa waaba nolasheennii. Wakhti kasta oo tagaa qayb adiga kaa mid ah ayuu la tagaa, wakhtigu degdeg ayuu kugu dhaafaa mana soo laabto.

Soomliduna waxay tidhaa“Wakhti iyo mawjad midna kuma sugaan”. Murti kale oo soomaliyeed ayaa ahayd saddex masoo laabtaan:

1. Odhaah aad tidhi

2. Falaadh aad gantay iyo

3. Wakhti kaa tagay.

Ibinu qayim: Illaahay ha u ha naxariistee ayaa waxa uu yidhi: “Wakhtiga oo lumaa dhimashada ayuu ka xunyahay, sababta oo ah wakhtiga kaa lumaa wuxuu kaa fogeeyaa Illaahay iyo aakhiro, dhimashadu se wuxuun bay kaa fogeyn adduunka iyo ehelka”.

Waqtigaaga oo aad si wacan uga faa'iideysato una maareyso wuxuu la mid yahay adoo noolashaada si wacan ugu guuleystay .

Muhiimadda Waqtiga

Waqtiga waa nolasheena, waa waxa kaliya een heysano si aan u noolaano, hadii uu dhamaado waqtigaagii aad dunida ku leheed, waxaa dhamaaday socodkaagii iyo safarkaagu ku aadanaa dunida, si aan u noolaano waxa aan u baahanahay in aan helno waqti, waqtigana waxaa inoo hadiyadeeyay Allah SW.

Waqtiga ahmiyaddiisa darteed ayaa Allah uu ugu dhaartay quraankiisa dhixdiisa in badan.

والعصر، والفجر، والليل، والشمس ، والضحى

Haddaba waqtigaaga qaaliga ah uga faa'iideeyso wax adduun iyo aakhiro kuu leh faa'iido. Muhiimadda uu waqtigu leeyahay saacaduhu ma sheegaan, lakiin muhiimada laguu siiyay ayaa ah inaad ku sameyso wax ku anfacaaya aduun iyo aakhiro.

HANTIDA DAAHSOON

Kuba xabaalaha ku jiro hadii la waydiiyo maxaad codsaneysiin ? Waxa ay oran lahaayeen in waqti lasiiyo si ay camal ka duwan kii hore ay u sameeyaan. Waqtiga waxa uu kaaga muhiimsanyahay Caafimaadka, Cilmiga, iwm.

Waqtigu waa Hanti sida hantiyaha kale Aqoonta maalka

Hadaba waxa uu kaga duwan yahay hantiyaha kale

1: Lama kaydin karo sida maalka loo kaydiyo cilmiga bugaagta iyo waxii la mida loogu kaydiyo.

2: Lama iibsan karo sida aad cilmiga hadaa lacag bixiso u iibsan karto anba wax ma haysato ahow anba taajir qof walba waxa uu haystaaa waa 24 saacadood.

3: Hadaba sida kaliya ee waqtigu ku kordhaaa kolba sidaad uga fa iidaysato 24 kaaga saacadood.

5: Lacagta kuma iibsankartid waqti, balse waqtiga waad ku sameyn kartaa lacag.

Hababka waqtiga looga faa'ideysto

Qof walba oo dunida jooga waxa uu heystaa 24 saacadood oo kaliya, majiro qof ka badan heysta ama ka yar, sidaa ay tahay oo ay dadku waqtiga u wada siman yihiin hadana xaga darajada waa ay ku kala sarreyaan, midi waa Hantiile, midi waa Sabool, midi waa dhaxdhaxaad, mid waa madaxweyne midna waa xirfadle, intoodaba ma jiro mid uu waqtigu u hiiliyay ama waqti siyaado ah haysta, kaliya waxa ay ku kala duwanyihiin sida ay uga faa'ideysteen waqtigooda.

Nidaaminta waqtigu Waa in uu qofku ilaaliyo ilbidhiqsiyada, daqiiqadaha iyo saacadaha soo maraya waana arrimaha ugu muhiimsan ugunna weyn ee qofku ay ku sugnaato aqoontiisu. Waxa laga soo weriyaaa culumadii hore inay odhan jireen: "goortay maalini isoo marto oo aan waxba uga faa'ideysan malintaydaa Barako umay sugnaanin" Sido kale Ninkii loo yaqaannay 'caamir binu Qays' waxa laga so weriyaa inuu nin ku yidhi "ila hadal" ka bacdi caamir waxa uu ugu jawaabay “Cadceeda qabo” yacnii Cadceeda sidaa anay u istaagayn ayuuna waqtigaygu u istaagayn.

Waqtigaaga oo aad maamusho waa adigoo muddo yar wax badan ku qabsaday. Waqtigaaga oo aan

nidaamsaneynna waa adiga oo wakhti aad u badan wax yar oo aan naf lahayn ku qabsaday amaba aan waxbaba qabsan. Wax soo saarkeenna wanaagsan ee qof ahaaneed iyo bulsho ahaaneedba wuxuu ku jiraa waqtigeenna oo aynu ka faa’iideysanno oo aynu maareynno.

Maareynta wakhtigu waxa ay ku xidhantahay himilada iyo hiraalka aad nolasha ka leedahay. Haddii aanaad hadaf dhaw iyo mid fog toonna lahayn wax macna leh kuuma sameynayso in aad maamusho ama nidaamiso wakhtigaaga. Marka nolashaadu nidaamsantahay yoolna aad leedahay isla markaana sidii aad u xaqiijin lahayd aad ku guda jirtid Wakhtigaagu wuu wanaagsanaanayaa waxa aanaad noqonaysaa qof ka faa’iideystay.

Laakiin haddii aanaad nolasha wax hadaf ah ka lahayn waxaaguna ay iska yihiin caadi iyo caado, himmiladaaduna anay dhaafsanayn cunno, hurdo iyo shaqo; way adagtay in wakhtiga si fiican aad uga faa’iideysato una maareyso. Si haddaba wakhtiga aad uga faa’iideysato marka hore waa in aad leedahay yool fog iyo mid dhaw intaba. Guusha iyo farxadda aad raadinaysaana waxa ay ku jiraan sida aad wakhtiga u maamusho.

Waqatigaaga waxaad ugaaga faa'ideysan kartaa adigoo sameysanaya shax ama jadwal eey kugu qoran yihiin

howlo maalmeedkaaga, iyo jadwal ay kugu qoranyihiin hadafyada aad dooneyso inaad gaarto, iyo in aad sacaadaha waqtigaaga u kala qeybiso dhowr qeybood, sida:

- Lix saac ood seexato.
- Lix saac ood wax barato.
- Lix saac ood shaqeyso.
- Lix saac ood waalidka caawido.

Waxaad heysataa maalintiiba 24 saacadood, 1440 daqiiqo, 86400 sikin, .

Waxaad heysataa sanadkiiba 8,640 saacadood, 518,400 daqiiqo, 31,104,000 sikin.

Intaa oo waqti ah kaga faa'ideeyso wax adiga ku anfacaya, bulshadana anfacaya, nolashaada dambana anfacaya. Hadii aad waqtigaaga maamusho waxa aad gaareysaa hadafyadaada, waxa aadna heleysaa mustaqbal ifaaya.

HANTIDA DAAHSOON

Abwaan Cismaan Yuusuf Keenadiid (AHN) waxa uu yidhi:

ayaa yidhi:

“Aduunyda caawiyo maalin weys ciribinaayaane

Cabbaarkii yaree kaa tagaa waa cad kaa go’ane

Cimrigaan gabaabsiga noqdeye sii ciriiri-yoobey

Camalfalasho wixii aan ahayn kagama ciil beeshid"

Nabiga SCW waxa uu yiri "ibnu aadamaoow anigu waxa aan ahay maalin cusub camalkaagana marqaati baan ka ahay ee iga faa'ideeyso maxaa yeelay masoo noqonaayo illaa maalinta qiyaame."

Cumar binu c/casiis waxa uu yiri" habeenka iyo maalinka waa ay kaa shaqeeyaan ee adiguna ka shaqeey"

Xasanul Basari waxa uu yiri "ibni aadamoow adiga waxa aad tahay maalmo, marka ay maalin tagtaba adiga badh kaa mida ayaa tagay"

"Waqtigu waa waxa aan rabno inta badan laakiin waxa aan isticmaalno ugu badan. Waqtiyada adag weligood ma jiraan, laakiin dadka adag ayaa sameeya."

HANTIDA DAAHSOON

Waqtigu waa mid duulaya adiguna waxa aad tahay duuliyihiisa, noqo darawal wanaagsan oo waqtigaaga u hoggaami sida ugu wacan. Waqtigu waa hanti kamid ah hantiyaha daahsoon ee aynu dareemin.

"Dhameys aadmigu ma aha

Dhawaan arag baynu nahay.

Caqligaa la is dheeryahee

Khalqigu dhaayaha ka siman

Waxay laba wada dhugteen

Ayuu ninba dhan u arkaa

Dhankaa waxaa uga socdaa

waxa dhacay dhaaf oo ka gudub

Waqtigu yuu kaaga dhumin

Dharaaro daraato tagay

Uyeelo dhug saa dambaa

Dhigtiyo talo kaa rabtee"

"Qiimaha waqtiga waa qiimaha Nolasha"

✓✓✓✓✓

Aqoonta/Cilmiga

Aqoontu waa fahamka iyo garashada shay.Aqoontu waa wacyiga, ama fahamka qof ama shay, sida xaqiiqooyinka, macluumaadka, sharraxaadda, ama xirfadaha, taas oo lagu helo waayo-aragnimo ama waxbarasho iyada oo la dareemayo, ogaansho, ama waxbarasho.

Aqoontu waa ilays, waa anshax, waa edab, waa anfac, waa aragti, waa il-fur. Bulshadii wax-bartay ubadkeeda ayuun baa badhaadhe gaadhaysa, ka badbaadaysa balan-balka, iyo baadida uu jahligu leeyahay. Aqoontu waa fahamka barashada shay ama ashyaa badan, waxaana loo bartaa si aad wax uga ogaato arrin jirta ama cusub, si loo daraaseeyo walax. Aqoontu waa iftiinka Aadanaha waana halka ay Soomaalidu ka tiraahdo “Aqoon la’aani waa iftiin la’aan”.

Aqoontu waa sheyga keliya ee Bini’aadanku ku horumari karaan, waxayna lagama maarmaan utahay nolosha Aadanaha, manasina dadka aqoonta leh iyo kuwa aan aqoonta lahayn.

HANTIDA DAAHSOON

Haddii aad wax uun baratay, waxaad Taqaannaa wax aysan dadku wada Aqoon oo ay bulshadu u baahantahay, Waxaadna leedahay garaad iyo maskax uusan qof kale laheyn isada oo kale, ee ku dadaal in ay aqoontaadu la falgasho shakhsiyaddaada, Aragtidaada iyo Qalinkaada, oo marka aad wax soo Qoreyso asxaabtaada la wadaag Aqoon, Fikir, xalka mushkilad taagan, wax daahsoon oo aad bidhaamisay, Arin aad Baraarujisay, iyo xog aad ku kordhineyso Keydka aqooneed ee saaxiibbadaa.

Allaylehe Qira’ada cilmigu, waa iftiin baxaye

Umadaha ilayskaa ka qada, aayatiin malahe

Hadba qoon awood gaaban baa, soo adoonsada’e

Anfacada la quutiyo ma helo, oon la dhuunyado’e

Arrad bay la wada qaawanyiin, aaran iyo dooge

Ubadkooda qawlaysatiyo, oorfanaw badane

Astaantoodu waa Qaanso iyo, Eebo iyo Leebe

Ambadkiyo qasaaraha umiga, waan ogsoonahaye

Omoskaa qodxaha badan intaan, nalagu aafaynin

Orda qaata buugtoo jahliga, xidha albaabkiisa

HANTIDA DAAHSOON

Wax-barashadu waa in ay keento isbedel bulsho oo wanaagsan, waa in aqoonta, iyo edaabtu ay noqdaan laba shay oo wada socda. Qof aqoon leh, haddana aan anshax lahayni wax badan ma anfacayo, wuxuuna la mid yahay geed bilaa hadh ah.

Aqoontu waa habka aad u ku ogaan karto xaqiiqada iyo xaalada dhabta ah ee taagan, aqoontu waa habka aad ku kala saari kartid saxa iyo khaladka, aqoontu waa habka aad wax u baadhi kartid kuna ogaan kartid xaqiiqda, aqoontu waa habka aad dhibaato taagan ku xalin kartid , aqoontu waa habka aad kuheli kartid aqoon iyo waayo aragnimo kaa dhiman, aqoontu waa is badal nololeed oo aad ka samaysay naftaada , aqoontu waa habka aad daaha kaga rogi kartid wax kaa qarsoonaa, kaas oo aad doonaysid inaad wax ku qabsatid, aqoontu waa habka aad wax qaldan ku badali kartid kuna sixi kartid.

Aqoontu waa ay balaadhan tahay, mana jirto shay kaliya oo la bartaa, mana jirto qaab kaliya oo wax loo bartaa , aqoontu waa ay badan tahay, siyaabo kala duwana waa loo bartaa, loona maraa , waxaanay leedahay wadooyin iyo sharciyo gaara oo lagu barto.

HANTIDA DAAHSOON

In wax la baadhaa waa aqoon la helay, in wax la xaliyaana waa aqoon la adeegsaday, aqoontu waa habka maanta heerkasta oo jira ina soo gaadhsiisay, waa habka iyo kala dambaynta, haday dawlad tahay, haayad tahay, shirkad tahay, ama shaqsiyaad tahayba lagu kala socdo

Aqoontu waxay dhistaa guri aan tiir lahayn, jaahilnimadana waxay burburisaa guri dhidibadiisu aasan yihiin, dadkiisuna ay ku noolyihiin farxad iyo sharaf. Si taas looga dheeraadana waa in ubadkeena aan barno aqoonta, jahligana aan kala dagaalano. Horumarkeenuna waxa uu ku dhisanyahay waa inta uu leegyahay aqoonteena.

Fariinta ugu weyn ee ay aqoontu xambaarsantahay ayaa ah isbeddel dhinac kasta ah oo taabanaya qaabka loo noolyahay markaas. Markasta oo aqoontu korarto waxaa badanaya isbeddelka xagga nolosha ah, mar kasta oo isbeddel jirona waxaa fududaanaya in la horumaro. Aqoonta waa hantida keliya ee ay dhaxli karaan Da’yarta si ay usii horumariyaan noloshooda iyo heerkooda aqooneed. Haddii ay dhallinyaradu dhaxlaan aqoon yari waxaa mugdi galaya horumarkooda mustaqbal taasoo sababta in da’yartu ku hodmaan wax aan faa’ido ugu jirin iyaga iyo dalkoodaba.

Faa'iidada barashada cilmiga

- In aad si adag wax u barato waxay kaa caawinaysaa inaad dhakhso u horumarto.
- Waxbarashadu waxay kaa dhigaysaa mid aad u adag.
- Waxay maskaxdaada ka dhigtaa mid afaysan.
- Waxbarashadu waxay ku siineysaa wood.
- Waxay kugu taageertaa inaad hesho riyada mustaqbalka.
- Waxad ka faa'ideysaa Horumarinta Xirfadaha Xallinta Dhibaatooyinka.
- Horumarin shaqsiyadeed, bulsho, iyo kobac dhaqaale.
- Waxay ku siineysaa nolol barwaaqo iyo farxad ku dheehan.
- Waxa ay kaa caawineysaa inaad barato beekhaaminta waqtiga, hantida, iyo ilaalinta bedqabkaaga.
- Cilmigu isaga ayaa ku ilaalinaya, halka uu maalku ilaalin adiga kaa rabyo.
- Aqoontu waa furaha guul kasta lagu gaari karo, waa furaha irid kasta oo xiran.

Waxtarka barashada cilmiga

Waxbarashadu waa barta ina siinaysa xirfadaha, farsamada, xogta iyo aqoonta aynu ku ogaano, ku fahanno, ku ixtiraamno waajibaadka aynu u hayno bulshadeena, qoyskeena iyo qarankeena. Sidaa darteed, baaxadda muhiimadda ay waxbarashadu u leedahay nolosha waa mid aad u weyn. Muhiimadda ay waxbarashadu u leedahay nolosha ayaa ah in ay ka caawiso qof walba in uu yeesho aragti wanaagsan oo uu ku eego adduunka. Waxbarashadu waxay naga caawisaa inaan helno fikrado cusub iyo sahaminta fikrado cusub.

Waxbarashadu waxay qofka ka caawisaa in uu aqoon helo oo uu wanaajiyo kalsoonida nolosha. Waxay kaa caawin kartaa inaad horumariso shaqadaada iyo kobacaada shaqsiyeed. Qofka wax bartay wuxuu noqon karaa muwaadin ku weyn bulshada dhexdeeda. Waxay kaa caawinaysaa inaad qaadato go'aamada saxda ah ee nolosha.

HANTIDA DAAHSOON

Waxbarashadu waxa ay door muhiim ah ka ciyaartaa nolosheena oo dhan waxa ayna wadada u xaartaa dhamaanteen si aan u gaarno awoodeena ugu sareysa. Marka aan ka hadlayno muhiimadda ay waxbarashadu u leedahay nolosha, aad bay muhiim u tahay in la fahmo waxa ay tahay waxbarashadu.

Waxbarashadu waa aalad muhiim ah oo qofka u sahlaysa in uu ogaado xuquuqdiisa iyo waajibaadka uu ku leeyahay qoyskiisa, bulshada iyo waliba dalkiisa. Waxbarashadu waxay kobcisaa himilada uu qofku ku arki karo adduunka iyo sidoo kale awoodda uu ula dagaallamo waxyaabaha khaldan, sida, caddaalad-darrada, musuqmaasuqa, rabshadaha, iwm. nolosha. Waxa kale oo ay wanaajisaa kalsoonida qofka noloshiisa, kalsooniduna waa furaha muhiimka ah ee guusha.

Waxbarashadu waxay ka dhigan tahay barashada maadooyinka si loo helo aqoon qoto dheer iyo in la fahmo maaddooyinka kala duwan ee loo adeegsan doono nolol maalmeedkeena. Erayga waxbarashadu kuma koobna aqoonta buugaagta ee waxa ay u taagan tahay aqoon aynu ka helno oo aynu khibrad u leenahay oo ka baxsan buugaagta ama fasalada.

HANTIDA DAAHSOON

Waxbarashadu waxay beddeshaa aragtideena si aan u aragno nolosha. Waxbarashadu waa shayga muhiimka u ah nolosheenna ee naga caawin kara inaan nolosheenna u beddelno si ka sii wanaagsan.

In aad caalim ama aqoonyahan aad noqoto waxaa ka horeysa inaad wax badan barato, cilmiga waxaa lagu keydiyaa akoon la yiraahd maskax, waana sheyga kaliya ee leh dhowr bilyan oo xarumood, yacnii cilmiga waxuu dagaa maanka iyo maskaxda qofka, dabadeedna waxa uu badalaa habdhaqanka qofka.

Waxbarashadu waa qayb ka mid ah aasaaska horumarka iyo korriinka oo dhan, qof ahaan iyo bulsho ahaanba. Wax walba waa suurtagal sababtoo ah wax walba waa la baran karaa.

Taariikhdu waa shay dunida laga tix raacaaye

Tagto iyo middii taagan iyo tan nagu soo fool leh

Siddaxdaba dadbaa tebiya oo laga tibaax daayaaye

Aqoonyahanku waa tiirka aan tahn ku gaarnaaye

Tacliin haddii aanay jirin sow tacaddi maaha.

Aqoonta (Xikmado)

- Qofkii heybad doonaya cilmiga ayaa heybad ugu filan.
- Nolasha waa sida qol mugdiya oo kale, waxaa iftiin ka dhiga waa Aqoonta.
- Aqoon u samir ama ka samar.
- Aqoonta waxa ay u baahantahay: Wakhti, dhaqaale, dulqaad, dadaal, maskax, tamar iyo karti.
- Aqoonta waa furaha horumarkaaga.
- Aqoonta waxa ay furtaa wado aad xoogaaga iyo muruqaaga ku furi wayday.
- Siddax raadi:
- Cilmiga
- Alla kacabsi
- Akhlaaqda wanagsan
- Aqoon la'aan waa iftiin la'aan.
- Hadii aadan maskaxda ka dhididin inta aad yartahay, marka aad gabowdo ayaad dhabarka ka dhididi doontaa.

HANTIDA DAAHSOON

- Wax baro si aad u sameyso isbedal la taaban karo.
- Wax barashadu waa geed macaan oo dhala miro macaan.
- Wax baro maanta si aad u noqoto hogaamiyaha berri.
- Qori wax mamaamula ee qalinkaa wax maamula.
- Qoriga dhig, ee qalinka qaado.
- Dhammaan kuwa ugu sarreeya ee aan ogahay inay yihiin wax-barta nolosha oo dhan.
- Waxbarashadu maaha diyaar-garow nololeed; waxbarashadu waa nolosha lafteeda.
- Kaliya kuwa wax bartay ayaa xor ah.
- Waxbarashadu maaha buuxinta weel, ee waa shididda shumac.
- U noolow sidii adigoo berri dhimanaya. Baro sidii adigoo weligaa noolaanaya.
- Wax badan oo aad akhrido, waxyaabo badan ayaad ogaan doontaa, in badan oo aad barato, meelo badan ayaad aadi doontaa.

HANTIDA DAAHSOON

- Waxbarashadu waa horumarinta nolosha dadka kale iyo inaad ka tagto bulshadaada iyo adduunkaaga si ka fiican sidii aad u heli lahayd.
- Barashadu waxay ka bilaabataa guul darro; fashilka koowaad waa bilowga waxbarashada.
- Waxbarashadu waa awooda lagu daboolo xaaladaha nolosha.
- Aniga ahaan waxbarashadu waxay horseed u tahay wixii horeba ugu jiray nafta ardayga.
- Waxbarashadu waa hubka ugu awooda badan oo aad u isticmaali karto inaad aduunka ku badasho.
- Daqiiqada aadan waxba baran waxaan aaminsanahay inaad dhimatay
- Waxbarashadu waa hanti meel kasta ka raaci doonta qofkii lahaa.
- Daqiiqada aadan waxba baran waxaan aaminsanahay inaad dhimatay.
- Waxbarashadu waa horumarinta nolosha dadka kale iyo inaad ka tagto bulshadaada iyo adduunkaaga si ka fiican sidii aad u heli lahayd.

HANTIDA DAAHSOON

Haddaad rabto taajir

Inaad faqri tuurto

Tacliin baro weeye.

Haddaad turuq xoogle

Lixaad togan dooni

Tacliin baro weeye.

Si aad u tallaasho

Ubuur tayo fiican

U tiigsato maanta

Adduunyada taagan

Tacliin baro weeye.

Tasbiixda salaadda

Sunnaha la tilmaamay

Si aadan u tuurin

Tacliin baro weeye.

C/nuur waddani

Dhamaad

Gabogabo iyo Gunaanad

Allah ayey mahad oo dhan u sugnaatay oo si wanaagsan iigu dhameeyay qoridiisa, adigana si wanaagsan kuugu dhameeyay akhrintiisa, waana kaaga mahad celinaa akhriskaaga quruxda badan, waxaana ku leeyahay wax akhriska ka dhigo mid kamid ah nolol maalmeedkaaga.